# Warqadda Xaquuqda ee loogu talagalay shaqsiyaadka lagu xiray Xeerka Argagaxisada ee 2000

Buugyarahaan wuxuu ku siineyaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xaquuqdaada sida uu u yaalo sharciga Scotland goorta aad ku jirto xabsiga ee saldhiga booliska. Dukumeentigaan wuxuu kuu sheegayaa wax ku saabsan xuquuqdaada ugu muhiimsan ee inta xabsiga laguugu haayo. Ma ahan talo sharci ahaan ah mana kuu sheegaayo dhammaan waxii ku saabsan xuquuqdaada. Waa inaad iskaa u raadsataa la-talin sharci ah oo madax-bannaan.

Sida ugu dhaqsiyaha badan fadlan aqri macluumaadkaan. Wuxuu kaa caawin doonaa si aad u gaarto go'aanno marka aad joogto ee saldhiga booliska. Fadlan waydii booliska si uu kuugu sharxo waxkasta aadan fahmeynin oo ku yaalo buugyarahaan, haddii aad rabto inaad si fudud u aqriisato nuqul ka baxso ama turjumaadda.

Xasuunow xuquuqdaada:

- Xaq ayaad u leedahay inaad ogaato sababta ay booliiska kuugu hayaan xabsiga.
- Xaq ayaad u leedahay inaad qareen yeelato oo loo sheego inaad joogto saldhiga booliska. Tani waa bilaash.
- Xaq ayaad u leedahay inaad yeelato qof kale oo laga yaabo inuu daneynaayo daryeelkaaga loo sheego inaad joogto booliska. Tusaale ahaan, kani waxaa laga yaabaa inuu noqdo xubin ka mid ah qoyska, daryeelle, ama saaxiib.
- Xaq ayaad u leedahay inaad aamusto. Ma ahan inaad ka jawaabto su'aa kasta oo ay ku weydiiyaan booliska. LAAKIIN waa inaad u sheegtaa magacaaga, ciwaankaaga, taariikhda dhalashadaada, goobta aad ku dhalatay iyo jinsiyadaada.
- Xaq ayaad u leedahay inaad la hadasho qareenka si gaar ah adigoon daahaynin ka hor booliska inta uu ku weydiinin su'aalo. Waxaad sidoo kale la hadli kartaa qareenka woqti kasta marka booliska ay ku weydiinayaan su'aalo.
- Haddii aad ka yar tahay 16, ama aad ka yar tahay 18 oo aad ku xiran tahay amarka kormeerka ee qasabka ah, waxaad sidoo kale xaq aad u leedahay inay kugu soo booqdaan waalidkaaga ama mas'uulkaaga ee saldhiga booliska.
- Xaq ayaad u leedahay inaad hesho gargaarka caafimaadka degdega ah.
- Xaq ayaad u leedahay inaad ka cawato qaabka ay kula dhaqmaayeen booliska.

# Xuquuqdaada

Fadlan xusuusnow: Xaaladaha gaarka ah, waxay xaq u leeyihiin booliska inay dib u dhigaan ama ay joojiyaan marin u helkaada oo qaar ka mid ah xuquuqahaan. Tusaale ahaan, haddii booliska uu ku fikiro inay u baahan yihiin in ay kula hadlaan adiga si ay u joojiyaan qof kale inaad dhaawacdo. Tani kama mid ahan xuquuqdaada inaad aamusto.

## 1. Macluumaadka loogu talagalay dadka lagu haayo xabsiga booliska

### • Oggaanshaha sababta laguu soo xiray ama laguu soo qabtay

Waa inay booliska ku siiyaan macluumaad si aad u fahanto sababta laguu soo xiray oo lagaaga shakiyay inaad ku lug leedahay amridda, diyaarinta ama dhiirigelingta ee argagixisada.

Goobta saldhiga booliska, waa inay kuu sheegaan booliska adiga sababta ay u aaminsanyihiin inaad u baahan tahay in lagu xiro.

Ka hor inta aan lagu weydiinin wax su'aalo ah oo ku saabsan ku lug lahaanshaha looga shakisan yahay argagixisnimada, waa inay ku siiyaan booliska ama qareenkaaga macluumaad ku filan oo ku saabsan waxa ay ku fikirayaan inaad sameysay adiga si aad u difaaci karto naftaada laakiin adigoon waxyeelaynin baaritaanka booliska.

### • Xuquuqda Aamusnaanta

Ma ahan inaad ka jawaabto waxii su'aalo ah ee ay ku waydiiyaan booliska ee ku saabsan waxa ay u maleynayaan inaad sameysay.

Waxkasta aad dhahdo waa la qori doonaa ama waa la duubi doonaa oo waxaa loo isticmaali karaa caddeyn ahaan maxkamadda, haddii kiiskaaga loo qaado maxkamad.

Waa inaad u sheegtaa booliska magacaaga iyo ciwaankaaga, taariikhda dhalashadaada, goobta aad ku dhalatay iyo jinsigaaga goorta ay ku weydiiyaan xogtaan adiga.

### • U sheegidda Qareenka inaad joogto saldhiga booliska

Waad waydiin kartaa booliska si ay ugu sheegaan qareenka inaad joogto booliska. Wuxuu noqon karaa kani qareenkaaga adiga gaarka kuu ah ama, haddii aadan garanaynin qareen, waxaa laguugu waci qareen. Booliska ayaa kuu diyaarin doono la xariiridda qareen sida ugu dhaqsiyaha badan. Tani waa lacag la'aan.

U sheegidda qof kale kaas oo laga yaabo inuu danaynayo daryeelkaaga inaad joogto ee saldhiga booliska.

Waad waydiin kartaa booliska si aad ula xariirto qof kale si loogu sheego iyaga inaad joogto saldhiga booliska. Waxy noqon karaan qof kale oo ka mid ah qoyskaaga, lamaanahaaga, daryeelkaaga, saaxiibkaaga ama qof kale aad garaneyso. Waxay kuugula xariirin doonaan qof adiga sida uga dhaqsiyaha badan oo ay u awoodaan.

## Haddii aad ka yar tahay 16 (ama aad ka yar tahay 18 oo aad ku xiran tahay amarka kormeerka qasabka ah)

- Booliska waa inay isku deyaan inay u sheegan waalidkaaga ama mas'uulkaaga inaad joogto saldhiga booliska.

- Waalidkaaga ama mas'uulkaaga wuu kuu imaan karaa oo wuu ku taageeri karaa inta la joogo saldhiga booliska.

- ### Helitaanka turjumaanka si laguu caawiyo

Haddii aadan ku hadleynin ama aadan fahmeynin Ingiriiska, booliska ayaa kuu diyaarin doona qof kaas oo ku hadla luuqaddaada (turjumaan) si uu kuu caawiyo. Tani waa bilaash. Waa muhiim inaad fahmi karto waxyaabaha la yiraaahdo marka saldhiga booliska la joogo.

Haddii aad tahay dagool ama dhib ku qabtid si fiican inaad ula xariirto, booliska ayaa kuu diyaarin doonaan qof ku caawiya adiga. Tani waxay noqon kartaa turjumaan yaqaana luuqadda Dhagoolka ee British-ka ama xifadle kale oo ku habboon. Tani waa bilaash.

- ### Haddii aadan u dhalan Ingiriiska

Haddii aadan u dhalan Ingiriiska, waxaad waydiin kartaa booliska si ay ula xariirraan Qunsuliyaddaada, Safaaraddaada ama qunsiliyadda wadankaaga, si ay ugu sheegaan meesha aad joogto iyo sababta aad u joogto saldhiga booliiska. Waxay sidoo kale kugu soo booqan karaan si gaar ah oo waxay kuu diyaarin karaan qareen si uu kuu arko.

- ### Maxaa dhacaayo haddii lagugu soo eedeeyo?

Haddii lagugu soo eedeeyay dembi, waxaa laga yaabaa in lagaa soo daayo xabsiga ama lagugu hayn karo saldhiga booliiska oo waxaa laguu qaadi karaa maxkamadda maalinta shaqada ee xigta Ama waxaa laga yaabaa in lagu soo siidaayo haddii aad oggolaato inaad aado maxkamadda taariikhda la go'aamiyay.

- ### Helitaanka dukumiintiyada

Qoraal caddeyn ah oo kiiska ka mid ah ayaa lagu siin doonaa adiga ama qareenkaaga haddii kiiskaaga maxkamadda la geeyo. Tani waxay kuu oggolaaneysaa ama qareenkaaga u oggolaaneyaa diyaarinta difaacaaga.

Xaq ayaad u leedahay inaad haysato turjumaadda ee macluumaadka la xariira haddii aadan fahmaynin Ingiriiska.

- ### Helitaanka gargaarka caafimaadka

Booliiska ayaa ku waydiin doona su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga iyo fayo-qabkaaga. Waa muhiim inaad u sheegto booliiska haddii aad qabto xaalad caafimaadeed ama daawo kuu socoto. Waxaa sidoo kale muhiim ah inaad u sheegto booliiska haddii aad qabto wax daroogo ah ama qabatiin khamri ah ama haddii aad ka fikireyso inaad nafsadaada waxyeelayso.

Booliiska waxaa laga yaabaa inay waydiiyaan dhakhtarka caafimaadka si uu kuu baaro adiga. Tani waxay gacan ka geysaneysaa sidii loo hubin lahaa in si wanaagsan laguu daryeelo inta xabsiga aad ku jirto. Haddii aad dareento inaad u baahan tahay inaad aragto dhakhtarka caafimaadka ka dib u sheeg booliiska.

Haddii aad xannuunsato, xaq ayaad u leedahay inaad hesho gargaar caafimaad.

- Cuntada iyo Cabidda

Biyo waa laguu keeni doonaa adiga markaad codsato. Waxaa lagu siin doonaa cunto haddii xabsiga aad ku jirto in ka badan muddo afar saacadood. Haddii aad leedahay cuntada xadidan ama sharuudo diimeed ka dib sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah ugu sheeg booliiska.

- Sameynta cabashada

Haddii aad dooneyso inaad cabasho gudbiso goorta aad joogto xabsiga, la hadal kormeere ama qof darajo sare wato. Haddii aad doonayso inaad cabasho gudbiso ka dib marka lagu soo siidaayay, waxaad tagi kartaa saldhig kasta ama wac 101. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa qof kale inuu kuu sameeyo cabasho adiga bedelkaaga, marba hadaad siisay iyaga oggolaanshahaaga oo qoraal ah. Wuxuu noqon karaa waalid, saaxiib, lammaane ama qof aad kalsooni ku qabto.

Haddii uu wax ku yeelay ama uu ku soo dhaawacay sarkaalka booliiska xiliga xiritaankaaga ama xabsiga booliiska waa inaad u cabataa Waaxda Heerarka Xirfada ee Booliiska Scotland.

### Haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah (fadlan ogow, tani waxay ku saabsan tahay macluumaad adeeg oo keliya oo xuquuq ma ahan):

Waxaad u baahan kartaa caawin si aad u fahanto waxa dhacaayo marka aad joogto saldhiga booliiska. Caawimaadaan waxaa ku siin kara qof taageera ah oo la yiraahdo Dadka waaweyn oo ku habboon. Tani waxaa laga yaabaa inay khuseyo haddii aad qabto xannuunka maskaxda ama naafinimada waxbarashada. La hadal booliiska haddii aad u maleyneyso inaad u baahan tahay caawimaadaan.

Haddii booliiska ay u maleeyaan inaad u baahan tahay taageerada ee Dadka waaweyn, waxay waydiin doonaan inuu hal qof kuu yimaado, xitaa haddii aadan waydiisan inuu hal qof kuu yimaado.

## 2. Macluumaadka loogu talagalay dadka oo ay booliiska su'aalo waydiinayaan

- Helitaanka Qareenka si kuu caawiyo

U sheeg booliiska haddii aad rabto inaad la hadasho qareen. Booliiska ayaa kugu xariirin doonaa qareenka sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtogalka ah.

Doorka qareenka waxa waaye inuu difaaco xuquuqahaada oo uu ku siiyo talo ku saabsan sharciga.

Waad dooran kartaa inaad la hadasho qareen aad garanayso ama qareenka wacitaanka. Qareenka waa mid madax-bannaan oo uma shaqeeyo booliiska.

Qareenka ayaa kuu sheegi doonaa haddii ay talo kugu siin karaan bilaash ama haddii aad lacag ku bixineyso talada. Haddii ay tahay inaad bixiso lacag, way kuu sharxi doonaan qiimaha inta ay ku kici doonto iyo sida aad u bixin karto iyada. Booliiska ma siin doono wax lacag ah qareenkaaga ama makala hadli doona qareenkaaga sida loo siinaayo lacagta.

waxaa laguu oggolyahay inaad la yeelato wadasheekeysi gaar ah qareenka ka hor inta booliiska ku waydiinin su'aalo haddii su'aalaha loo baahan yahay in lagu waydiiyo arrin ama degdeg jiro, sababo nabadgeliyo awgeed.

Waad bedeli kartaa go'aankaaga la hadlidda qareenka ee waqti kasta. U sheeg booliiska sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtogalka ah oo waxay kula xariirin doonaan adiga qareen.

Haddii qareenka uusan imaanin saldhiga booliiska goorta ay dhaheen waan imaad karnaa, ama waxaad u baahan tahay inaad la hadasho markale booliiska, waydii booliiska inay la hadlaan markale qareenka.

Xaq ayaad u leedahay inuu kula joogo qareenka qolka dhaxdiisa marka booliiska ay ku waydiinayaan su'aalo haddii ay jiraan su'aalo degdeg ah loo baahan yahay in lagu waydiiyo ka hor inta qareenka ka soo galin sababo nabadgeliyo awgeed.

- ## Muddo intee la'eg ayaa laguu hayn karaa su'aalo waydiinta?

Booliiska waxay kugu hayn karaan su'aalo waydiinta ilaa 48 saacadood ayagoon dambi kugu soo eedeynaynin. Marwalba waa inuu eegaa kiiskaaga sarkaalka booliiska sare si uu u arko haddii ay tahay weli in lagu sii xiro. Tani waxaa la yiraahdaa dib u eegis. Keliya waxaa lagu xiri karaa in ka badan 48 saacadood haddii maxkamadda ay oggolaato. Maxkamadda way sii dheereen kartaa mudada xiritaanka eedeyn la'aan ugu badnaan ilaa 14 beri laga soo bilaabo xiritaankaaga. Xaaladahaani waa in lagu siiyaa adiga kuwa soo socda:

  - Dukumiinti qoraal ah oo codsiga xiritaankaaga lagu dheereenaayo ayaa la sameeyay;
  - Woqtiga codsiga la sameeyay;
  - Woqtiga codsiga lagu dhageysanaayo maxkamadda gudaheeda; iyo
  - Sababta(yaasha) xiritaanka dheeriga ah ay la raadinayaan.

Waa in oggeysiis lagu siiyaa adiga (iyo wakiilkaaga sharciga) waqti kasta oo la sameynaayo codsi lagu dheereenaayo ama lagu kordhinaayo xiritaankaaga.

Adiga iyo qareenkaaga xaq ayaad u leedihiin inaad ka hadashaan waxii ku saabsan go'aankaani, ilaa xaalada aysan ahayn mid fiican. Qareenka wuu kaala talin karaa arrintaan.

- ## Soo Booqadayaasha Xabsiga ee Madaxa-bannaan

Waxaa jira xubnooyin ee bulshada ka mid ah kuwaas oo loo oggolaaday inay galaan saldhiyada booliiska. Waxaa loo yaqaanaa sida Soo Booqodayaasha Xabsiga ee Madaxa-bannaan waxay ku shaqeeyaan si iskaa ah si ay u hubiyaan dadka xiran in loola dhaqmaayo si fiican oo ay helaan xuquuqooyinkooda.

Xaq uma lihid inaad aragto Soo Booqodayaasha Xabsiga Madaxa-bannaan ama waydiiso iyaga inay ku soo booqdaan laakiin soo booqadaha waxaa laga yaabaa inuu waydiiyo si kuu arko. Haddii Soo Booqodayaasha Xabsiga Madaxa-bannaan ay ku soo booqdaan inta aad xabsiga ku jirto waxay matili doonaan si madax-bannaan ee booliiska si ay u hubiyaan daryeelkaaga iyo xuquuqdaada in la ilaaliyay. Waa dooqaaga haddii aad doonayso inaad la hadasho iyaga.